



Dib-u-meelayn

Qofna lama filayo inuu hadda dhaqaaqo. Qoysaska aan u baahnayn inay isla markiiba guuraan waanu la xiriiri doonaa dhamaan goobaha lixda bilood ee soo socota si aan u bixino talo iyo taageero. Waxaan sidoo kale ognahay inay jiraan codsiyo badan oo wareejin ah waxaan kala shaqayn doonaa qoysaskan si aan u fahanno baahiyahooda dib-u-dejinta.

waxaa sidoo kale muhiim ah inaysan jirin wax isbedel ah oo lagu sameynayo xuquuqda kireystaha ama kirada.

Hab ku habboon qoys kasta ayaa loo mari doonaa

Waxaan fahamsanahay inaysan jirin laba qoys oo isku mid ah. Marka la soo gaaro waqtigii laga fikiri lahaa dib-u-meelaynta, kooxdayada khibrada leh ayaa:

- bixin doona ogeysiis iyo macluumaad badan (oo ay ku jiraan mid ku qoran luuqad aad fahmi karto)
- inay ku dhagaystaan si ay u fahmaan baahiyaha iyo duruufaha shaqsiga ah
- ku siiyaan macluumaad, taageero iyo xulashooyin ku aadan dib-u-dejinta
- Xaqiijin doonaan ku xisaabtanka kala duwanaanshaha ijaartaha iyo dhaqanka

Si loo hubiyo in guri cusub uu ku habboon yahay kireystayaasha, noocyo kala duwan oo xulasho guri ah ayaa la bixin doonaa. Halka qoysas badani ay codsadaan inay wada joogaan, waxaan sameyn doonaa da'daal kasta oo aan ku taageerayno taas.

Dayactirka iyo waxyaabaha la dhisayo ee socda

Waxaan sii wadi doonaa dhamaan dayactirka iyo wixii u baahan hagaajin sida loogu baahan yahay. Wixii dayactir degdeg ah, fadlan kala xidhiidh Xarunta Wicista Guriyeynta (Housing Call Centre) **13 11 72** ama booqo: housing.vic.gov.au/repairs

La soco wixii soo cusboonaado oo qayb ka noqo

Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan dib u dhiska saraha dheer booqo websaydkayaga oo ah: homes.vic.gov.au ama iimayl noogu soo dir: enquiries@homes.vic.gov.au


La talinta laga heli karo deegaankaaga

Codkaaga ku biiri mabaadi'da bulshada oo ka caawi hagidda mashruuca. Si aad u ogaato dhacdooyinka la-talinta ee ka socda xaafadaada booqo: homes.vic.gov.au/high-rise-victoria

Is diiwaangeli si aad u hesho wixii soo cusboonaada ee mashruuca ah iyo wax kaloo dheeraad ah adigoo booqanaya www.homes.vic.gov.au/sign-up-project-updates

Macluumaad luuqadaada ah

Si aad u hesho nooca ogaysiiskan ee la fasiray, iskaan garee QR koodka hoose:



Waxaa oggolaatay oo daabacday Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne. © Gobolka Victoria, Guryaha Victoria (Agaasimaha Guriyeynta), Oktoobar 2023. Waxaa daabacday Finsbury Green, Melbourne Victoria (HV017923)

Somali | Soomaali

Dib-u-dhiska saraha dheer

h v homes victoria

VICTORIA State Government Families, Fairness and Housing

Wixii soo cusboonaaday ee loogu talagalay Bulshada

Noofeembar 2023



Daah-furka mashruuca dib-u-dhiska saraha dheer

Waxaan bilownay inaan qaadno tillaabooyin aan howlgab uga dhigayno 44 dhisme oo dhaadheer oo guryaha dadweynaha ah si aan u bixino guryo casri ah, raaxo leh, oo waara oo loogu talagalay kireystayaashayada.

Ilaa wixii ka dambeeyay isbuucii lagu dhawaaqay, waxaanu samaynaynay inaan la hadalno oo aan dhageysano kumanaan guryaha degan anagoo ku bilownay boqolaal shaqaale iyo turjubaano xiriir la sameeyay in ka badan 5,000 oo qoys inagoo markaas ka hirgalinay goob kasta meelo aan dadka ku dhageysano.

Tani waa tii ugu horreeysay oo wada-hadallo badan ah, mudnaantayaduna waa inaan la shaqayno kiraystayaasha marka hore si codkaagu u hago mashruucan muddada dheer ah.

Khamiista 26ka Oktoobar iyo Isniinta 30ka Oktoobar, waxaan madasheenii bulshada ee ugu horeysay u qabanay dadka kirada ugu jira saraha dheer ee North Melbourne iyo Flemington.

Kulamada si fiican ayaa looga soo qayb galay waxayna noo siiyeen fursad wayn in aanu ku dhegaysano oo aanu ka jawaabno su'aalo kala duwan oo ay qabeen dadka kirada ugu jira isla mar ahaantaasna aan hubino in kiraystaha iyo fikradaha bulshada, fikradaha iyo ra'yiga ay gacan ka geystaan qaabaynta mashruucan muhiimka ah.



Waxaa naga go'an inaan siino natiijooyinka guriyeynta ugu wanaagsan dhammaan kireystayaasha saraha dheer iyo bulshada, waxaan sii wadi doonaa inaan dhageysano, la shaqeyno oo aan bixino macluumaad iyo wixii markaas soo cusboonaado inta aan si tartiib-tartiib ah ugu wadno barnaamijka.



Homes Victoria waxay aqoonsan tahay Mas'uuliyiinta Dhaqanka ee dhulka lagu dhisayo gurigan. Waxaan xushmad u heynaa odayaashoodii hore, kuwa jooga iyo kuwa imaan doona.

h v homes victoria

VICTORIA State Government

Bulshadaada. Codkaaga.

Codka kireystayaasha waa awoodda bulshooyinkeena ku nool dabaqyada dhaadheer.

Todobaadyada soo socda waxaan sii wadi doonnaa wadahadalka waxyaabaha ay ka mid yihiin:

- sii wadista xiriirka lala leeyahay bulshada iyo dalka,
- taageerooyinka kireystayaasha inta lagu jiro xilliga guuritaanka,
- mudnaantaada ku aadan naqshadeynta guryaha cusub iyo xaafadaha iyo waxyaabo kale oo badan.

Ujeeddadu waa in la dhiso mabaadii bulsho ee la wadaago si ay u hagto qorshaynta hore ilaa dib loogu celinayo kiraystayaasha guryaha cusub.

Waxaan rabnaa inaan maqalno codadka ugu badan ee suurtoogalka ah waxaana sidoo kale la xiriiri doonaa ururada iyo bixiyeyaasha adeega taageera bulshooyinka. Horaanta sanadka soo socda waxaan wadaagi doonaa wixii aan maqalnay waxaana mabaadi'daas ka dhigi doonaa mid uu qof walba heli karo.

Booqo homes.vic.gov.au/high-rise-victoria si aad u aragto waxa ka socda xaafadaada.

Sababta waqtigii saxda ahaa hada loo soo gaaray

Dabaqyadeena dhaadheer waxay taagnaayeen ku dhawaad 70 sano, laakiin hadda waxay ku dhowdahay dhammaadka noloshooda shaqo. 44-ta dabaq waxaa lagu dhisay heerar duugoobay oo ah raaxada kulaylka, waaritaanka, daminta qaylada, hawo-qaadista, iyo sida loo geli karo. Ka dib markii aan tixgelinay dib u eegis, waxaan ogaanay in dabaqyada aysan ku habooneyn dayactirka.



Warshada guryaynta dadweynaha ee Holmesglen, 1949, Credit: Lyle Fowler



Barxad nololeed iyo balakoon - guryo cusub oo ku yaal Victoria Street, Flemington

Bixinta guryo ka wanaagsan

Waxaan bixin doonaa guryo badan oo ka wanaagsan si fiicana ugu xidhan bulshada iyo adeegyada.

Dhammaan guryaha cusub waxay lahaan doonaan:

- Dhamaantood Heerarka Naqshadeynta Guryaha oo kuwa hada jira ka sii wanaagsan
- Qiimaynta Naqshadeynta Guryaha Lagu noolaan karo oo Heerka Silver ah
- Ugu yaraan 5% guryaha bulshada ayaa si buuxda u raacaya Sharciga Takoorka linta (Disability Discrimination Act - DDA).
- Meelo banaan oo gaar ah sida balakoonooyin ama deyrar
- 5 xidigta cagaaran qiimaynta tamarta iyo 7 xiddigood Nathers qiimaynta celceliska
- Raaxada sanadka oo dhan iyo kululaynta iyo qaboojinta ka jaban kululaynta iyo qaboojinta ka jaban
- Isticmaalka wanaagsan ee tamarta dib loo cusboonaysiin karo

Waxaan kordhineynaa tirada guryaha bulshada ee ku yaala goobahan ugu yaraan boqolkiiba 10.

Goobaha dabaqyada koowaad

Goobaha ugu horreeya ee dib-u-dhiska dabaqyada dheer laga hirgalinayo 2028 waxaa ka mid ah dabaqyada dhaadheer ee hadda bannaan:

- 20 Elgin Street, Carlton
- 141 Nicholson Street, Carlton

Dabaqyada kale ee loo qorsheeyay dib-u-dhiska 2031 waxaa ka mid ah:

- 120 Racecourse Road, Flemington
- 12 Holland Court, Flemington
- 33 Alfred Street, North Melbourne



Guryo cusub aadna helayso fursado dib-u-dejin oo ah Victoria Street, Flemington

Xiriirka bulshada in la sii wado

Iyada oo qayb ka ah hawlaha dib u dhiska dabaqyada dhaadheer ee North Melbourne iyo Flemington, waxaanu kala hadalnay in ka badan 400 kirayste wixii ku saabsan ka guurista guriga, iyada oo ku dhawaad tiro intaas la mid ah oo balamo ah oo loo qorsheeyay toddobaadyada soo socda si looga hadlo baahiyaha raritaan ee qoyska.

Nala socio si aad u ogaato wixii ku saabsan booqashooyinka guryaha cusub ee Flemington oo bilaabmaya dhawaan iyo North Melbourne oo bilaabmaya horraanta sanadka soo socda.

Dhisidda guryo casri ah iyo tas-hiilaadka bulshada oo la hagaajiyay waxay ka dhigan tahay in bulshooyinkani ay sii joogteyn doonaan isku xirnaanshaha iyo horumarka.